

Sidee Ayaan U Ogaan Karaa in Ilmahaygu Hor Umar Samaynayo?

How Will I Know If My Child is Making Progress? (Somali Version)

Caruurta waxa ay iskuulka u tagaan in ay wax bartaan, dhab ahaan. Laakiin, waalidka caruurta laxaadka la'a, waxa ay iswaydiiyaan "sidii ayaan u ogaan karaa in ilmahaygu hor umar samaynayo?". Waalidku waxa ay jawaab kala heli karaan warbixin badan oo ku saabsan ilmahooda, xaga waxbarashada gaarahaaneed iyo warbixinta waxbarashada guud ahaaneed iyo meelo kaleba.

Meelaha laga helo waxbarashada gaarahaaneed

Sharciga loo dajiyay dadka laxaadka la'a ee dib loo habeeyaya 2004 (IDEA) waxa weeyaan sharci ku saabsan natiijada waxabarashada gaarahaaneed ee ardayda. Sharciga IDEA waxa uu dhigayaa in skuuladu fiirto gaar ah u yeeshaan hor umarka caruurta laxaadka la'a. hoos waxa ku qoran afar qaybood lagu qiyaaso hor umarka.

(1) Natiijada qiimayntii ugu dambaysay ee ardayga. Ardayda looga shakiyo in ay leeyihiin laxaad la'aan (disabilities) waxa lagu sameeyaa qiimayn (evaluation) inta aan loo bilaabin waxabarashada gaar ahaaneed. Qiimaynta nooca ah waa mid laga eego dhinac badan oo ay ka mid yihiin xaga maskaxda, dhaqanka, muuqaalka iyo korshiiimaha, iyo meelaha kale oo looga shakiyoba. Qiimaynta hore waxa laga helaa warbixin u noqon karta hor udhac dajinta waxbarashada gaarahaaneed (IEP) iyo hab lagu qiyaaso hor umarka. Marka ardayga loo qorsheeyo waxbarashada gaarahaaneed, waa in skuulku dib ubaadhid ama qiimayn labaad sameeyaan ugu yaraan sadexdii sano mar. waxa aad isku fiirin kartaa labada qiimayn si aad u ogaato hor umarka ilmahaaga. Waalidku waxa ay xaq u leeyihiin in ay heli karaan koobiga qiimaynta iyo in laga dhaadhiciyo wixii warbixin ah.

(2) Ulajeedada sanadka ee laqiyaase karo. Qorshaha waxabarashada gaarahaaneed ee ilmahaaga waa in ay ku jirta ulajeedo (annual goals). Goob kasta oo loogu talagalay in lagu qoro heerka larabo waa in qorshaha

waxbarashada gaarahaaneed (IEP) lagu muujiyaa heerka ardaygu uu taagnaa marka hore, heerka lala rabo. Warbixin kasta oo ku qoran ulajeedada waa in lagu muujiyaa kartida, ama dabciga la rabo in wax laga badalo iyo heerka la damacsanyahay in la gaadhsiiyo. Waxa lagu soo dirayaa warbixin ku saabsan hor umarka ilmahaaga iyo koolba heerka uu taganyahay.

(3) Warbixinta hor umarka. Qoraalka IEP waa in lagu muujiyaa inta jeer ee la qiyaasi doono hor u marka ilmahaaga iyo sidii lagu wargalin lahaa. Waa in waalidka la war galyaa hor umarka ilmahooda ku jira waxbarashada gaarahaaneed sida loo war galiyo kuwa aan ku jirin oo kale. Kaadhka warbixinta, qoraal warbixin ah iyo kulamo lala yeesho macalimiinta ayaa ka mid ah sida waalidku ku ogaan karaan hor umarka iyo kolba heerka uu taaganyahay ilmahoodu. Waxyaabaha aan soo sheegnay ayaa waxa ay waalidka u fasaxaan in ay qiyaasaan in ulajeeda IEP ee sanaka la fuliyaya.

(4) Dib uhabaynta IEP ee sanadka. IEP cusub ayaa sanadkiiba loo dajiyaa caruurta ku jirta waxbarashada gaarahaaneed. Waa in ay IEP ku jirta warbixin ku saabsan heerka ardaygu uu taaganyahay. Waxana waalidku isku fiirin karaan tii sanadkii hore. Waxa kamid ah habka wax akhriskiisu isubadalay? Heerka uu ka joogu hawl qabadak inta uu isbada waa sidee?

Qaybta waxbarashada guud

Caruurta laxaadka la'a (disabilities) waxa ay xaq uleeyihiin in ay ka qayb qaataan waxabarashada guud—qorshaha loogu talagalay caruurta caadiga ah. Waalidku waxa kale oo ay ka heli karaan warbixin dheeraad ah.

(1) Warbixinta macalinka. Hadii ilmahaagu uu ku jiro xiisadaha caadiga ah inta ubadan waxabarashadiisa, waxa aad ka qayb qaadan kartaa kulanka dhex mara waalidka iyo macalinka, iyo waxyaabaha lagu qabto iskuulka si aad uheshid warbixin hor umarka ilmahaaga. Waxyaabaha ay aradydu kaga



Technical Assistance ALLIANCE
for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

shaqeeyaan iskuulka, imtixaanaadka, iyo kaadhka warbixinta ayaad ka heli kartaa akhbaar muhiim ah.

(2) **Imtixaanka qiimaynta ee dagmada.** Arady waliba waxa uu xuquuq uleeyahay in uu ka qayb qaato imtixaankaas. Waxa ka mid ah imtixaanka loo yaqaan Iowa Basic Skills test (IBST) iyo imtixaanka California Achievement Test (CAT). Imtixaanadaasina waxa ay isbarbar dhigaan ardayda isku da'ada iyo fasalka ah. Waxa aad u isticmaali kartaa imtixaanka in aad ku fiiriso heerka ilmahaagu ka waxbarashadiisa marka loo eego caruurta da'adiisa ah.

(3) **Imtixaanka qiimaynta ee gobolka.** Caruurta laxaadka la'a (disabilities) waxa ay xaq uleeyihiin in ay ka qayb qaataan imtixaanka iyada oo lagu taageeryo wixii ay ubaahanyihiin. Hadii kooxda IEP ay go'aamiyaan in ilmuhu uuna qaadan karin imtixaankaas sikasta oo loo taageeroba, hadana waa in gobolko si gaar ah imtixaanka uga qaadaa.

(4) **No Child Left Behind Act / Sharciga ah Ilmo Laga Tagayaa ma jiro** caruurta laxaadka la'a waxa ay xaq uleeyihiin in lagu daro marka laqiimaynayo iskuulada iyada oo la eegayo heerka waxbarashada ardayda. Waana la war galinayaa waalidka kolba heerka iskuulka ilmahoda taga uu taganyahay.

Warbixinta laga helo meelaha ka baxsan iskuulka.

Iskuulku ma aha goobta kaliya ee laga helo warbixinta hor umarka waxbarashada ilmaha. Qiimaynta ka madax banaan iskuulada ayaa warbixin laga heli karaa.

Qiimaynta madax banaan

Caruurta waxa lagu qiimayn karaa meel kamadax banaan iskuulka oo mararka qaarkood iskuulku uu bixiyo wixii kharash ah ee ku baxa. Si walba ha udhacdo eh qiimaynta madax banaan natiijada kasoo baxda waxa la isbarabar dhigi karaa imtixaanadii hore.

Ufiirsashada kartida ilmaha xaga guriga iyo bulshada

Waad ufiirsan kartaa in ilmahaagu iskuulka ka bartay khibradaha guud. Waxaana micnaheeduna yahay in uu khibradaha ku isticmaali karo guriga iyo iskuulkaba. Waxa ka mid ah, mala fahmi karaa ilmaha guriga iyo dibadaba? Ilmahaagu sidee ayuu ku yahay xisaabta, lacagta ma tirinkaraa?. Kartidaa ma leeyahay oo sanadkii hore ma dhaamaa?.

Maxaan yeeli karaa hadii ilmahaygu hor umar lahayn?

Hadii aad u aragtid in ilmahaagu uuna samaynayn hor umar xaga waxbarashada, waxa aad codsan kartaa kulan si wax looga badlo IEP. Skuulku kama balan qaadi karo in la hobo hor umar in uu ilmuhu gaadhi doono, laakin waa in ay isku taxalujiyaan si daacad ahna u caawiyaan ilmaha.

Waxa kale oo la qaban kara kulanka kooxda IEP si looga wada hadlo wixii isbadal ah ee loobaahanyahay si hor umar loo gaadho. Isbadalka ilmuhu ubaan karo waxa ka mid ah:

- waxbarashada gaar ahaaneed iyo wixii la xiriira.
- qalabka caawimaadka
- habka waxbarashada
- goobata waxbarashada

Hadii ay dhacdo in kooxda ay ku heshiin waayaan in uu ilmuhu hor umar samaynayo iyo inkale, waxa loo baahan karaa warbixin dheeraad ah. (warbixinta dheeraadka ah waxa aad ka fiirisa qoraalka Alliance ee "Evaluation: maxay ilmaha u qabataa?")